# Licensing Division (Waaxda Liisamada, LD)
# Baadhitaanka Cabashada Aan Ahayn CPS

## *S'aalaha badanaa la iska waydiiyo Mulkiilayaasha & Maamulayaasha Daryeelka Ilmaha*



**Q: Waa maxay Licensing Division (LD) Aan ahayn CPS ama eegista cabashada sharciga?**

**A:** *Marka Department of Children, Youth & Families (Waaxda Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska, DCYF) ay hesho cabashada xarumaha daryeelka caruurta sharciga leh kaas oo aan lahayn eedaymo xadgudub ilmo ama dayacaad balse laga yaabo inay xadgudub ku tahay Washington Administrative Code (Xeerka Maamulka Washington, WAC), macluumaadkaas waxa lagu baadhaa qaadashada aan ahayn CPS.*

**Q: Dhammaan qaadashada aan CPS ahayn ma waxay keentaa eegitaanka cabashada?**

**A:** *Maya, waxay ku xidhan tahay waxa la sheego. Haddii cabashadu ay muujiso xadgudub WAC, waxaa laga yaabaa in la eego si loo go'aamiyo inuu jiro xadgudub.*

**Q: Yaa samaynaya baadhitaanka cabashada?**

**A:** *DCYF waxay wargelin doontaa kooxda liisamada deegaanka wixii qaadasho ah. Horjoogaha deegaanka ayaa ku qori doona cabashada cida liisanka haysta baadhitaan.*

**Q: Wakhti intee le'eg ayuu nidaamka cabashadu qaadan doontaa?**

**A:** *Waxaa lagu dadaalayaa in eegitaanka lagu soo gabagabeeyo 45 maalmood gudahood; si kastaba ha ahaatee, eegitaanka qaar ayaa laga yaabaa inay qaataan waqti dheer.*

**Q: Macluumaad sidee ah ayay tahay in la diyaariyo?**

**A:** *In la heli karo shaqaalaha, duwaanada, iyo siyaasadaha wakhtigan marka la dalbado.*

**Q: Maxaa la iiga sheegi doonaa cabashada?**

**A:** *Waxaa lagugu wargelin doonaa eedeymaha ama walaacyada la soo sheegay. Sharci bixiyahaaga ayaa kula wadaagi doona macluumaadka ugu badan ee suurtogalka ah iyada oo aan khatar gelinaynin sumcada eegitaanka cabashada. Macluumaadka ku saabsan tixraacaha, ama qofka cabanaya, lalama wadaagi doono.*

**Q: Waa maxay masuuliyadayda wkahtiga eegitaanka cabashadu?**

**A:** *Inaad si waadax ah u ula wadaagto macluumaakda wkahtiga waraysiyada, kormeerka iyo akhrinta duwaanada.*

**Q: Hadii shaqalaaha liisanka uu dalbado liiska macluumaadka xidhiidhka oo dhamaystiran oo qoysask ku jira ah, xataa hadii caruur gaar ah dhacdadu ku saabsan tahay, miyuu siinayaa bixiyuhu macluumaadkaas?**

**A:** *Haa, sida uu dhigayo* **WAC 110-300-0035 (2)(c)** **(https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-300-0035)**, **110-301-0035 (2)(c)** **(https://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-301-0035)**, *iyo* **110-302-0035 (2)(c)** **(https://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-302-0035)**, *waaxdu waxay diidi kartaa, joojin kartaa, ka noqon kartaa, ama ayna sii wadi karin liisanka marka cida liisanka la siiyay ay siido inay u ogolaato shaqaalaha waaxda ee awooda u leh inay helaan wax kamid ah kuwa soo socda: Duwaanada ama faylasha Ilmaha, shaqaalaha, ama barnaamijka.*

**Q: Yaa la waraysan doona inta eegitaanka cabashadu socoto?**

**A:** *Mudada eegitaanka cabashadu ay socoto, cida liisanka haysata, maamulaha, iyo shaqaalaha ay khusayso iyo kabalyeeriyada, ayaa la waraysan doonaa. Cida lagu sheegey cabashada ayaa sidoo kale la waraysan doonaa. Cida damiinka lagala xidhiidhayo waxa laga yaabaa in sidoo kale la wareysto.*

**Q: Yay tahay inuu joogo marka shaqalaaha la waraysanayo?**

**A:** *Macluumaadka la heley mudada baadhitaanku waa sir. Waxaa isla leh ikhtiyaarka waraystaha hadii uu doonayo inay joogaan cid kale ilaa inta cida kale aan loo arkin cid waxyeeli karta eegitaanka cabashada.*

**Q: Mala bixin karaa abayaan qoraal ah?**

**A:** *Haa, waxaad soo gudbin kartaa hadal qoraal ah Haddii la helo ka hor inta aan la dhammaystirin eegitaanka cabashada, waxaa loo tixgelin doonaa qeyb ka mid ah eegitaanka cabashada.*

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

**Q: Miyuu shaqaalaha daryeelka ilmahuhu diidi karaa wixii su'aalo ah?**

**A:** *Shaqaaluhu waxay dooran karaan in aan la waraysan. Natiijadu waxay weli soo bixi doontaa iyada oo aan xogtooda laga qaadin oo waxay ku salays naan doontaa wixii ka uruuriyay inta eegitaanka cabashadu uu socday. Wixii macluumaad ah ee laga reebo waxay saamaynaysaa natiijada cabashada la xaraynayo.*

**Q: Waa maxay shuruucda ku saabsan kala xidhiidha shaqaalaha daryeelka ilmaha taleefankooda shakhsi ahaaneed?**

**A:** *Marka dhamaan ay macquul tahay, shaqaalaha daryeelka ilmaha ayaa lagu waraysan doonaa goobta. Waxaa jiri kara wakhtiyo lagula xidhiidhayo shaqaalaha daryeelka ilmaha taleefankooda gacanta ee shakhsi ahaaneed marka aan lagu waraysan karin goobta.*

**Q: Xaaladahee ayaa loo shaqeeyaha inuu goobta yimaado aan loo ogolayn wakhtiga cabashada?**

**A:** *DCYF waa inay ka jawaabtaa khatarta shaqaalaha inuu meesha joogo inta la wado baadhitaanka cabashada LD/CPS, marka ruuxa shaqaalahu uu yahay ka la baadhayo. Natiijada khatarta qiimaynta ayaa keeni karta qorshe amaan oo ruuxa shaqalaaha ahi uu ku joogi karo goobta, iyada oo shaqaale kale si buuxa u kormeerayaan ruuxa, uu qabanayo shaqada goobta iyada oo aanay is gaadhaynin caruurta, ama qorshaha lagu heshiiyay, oo leh daryeelka ilmaha, in la fasaxo mudo ruuxa shaqaalaha ah. Shaqaalaha looma ogola goobta inuu joogo marka taariikhdiisa hore ee la eegey ayna u fasixin. Marka tan laga tago, bixiyaha daryeelka ilmaha ayaa go'aaminaya hadii shaqaalaha ay tahay in aanu meesha joogin siday dhigayaan siyaasadahooda barnaamijku.*

**Q: Maxay yihiin natiijooyinka suurtagalka ah ama natiijooyinka eegitaanka sideese la ii ogeysiin doonaa?**

**A:** *Natiijooyinka eegitaanka cabashada sharci siinta ama natiijooyinka waa laba mid uun "Wax sax ah" ama "Wax aan ansaxeynin." Waxaad heli doontaa ogeysiin qoraal ah marka eegitaanku dhammaado.*

*Helitaanka sharci-siinta "**Saxda**" macnaheedu waa inay jirto sabab macquul ah oo lagu aamino xadgudubka WAC inuu dhacay. "**Ma ansaxayo**" macnaheedu waa inay jirto sabab macquul ah oo lagu aamino xadgudubka WAC ma dhicin ama aan la go'aamin karin haddii xadgudub dhacay. Dhammaan natiijooyinka sharci bixinta ee saxda ah waxay ku xidhan yihiin heshiiska cabashada, tababarka, iyo/ama tababarka si loo helo u hoggaansanaanta WAC.*

**Q: Maxaa dhacaya haddii aan diido helitaanka?**

**A:** *Hadii aanad ku qancin natiijada, waxa aad dalban kartaa dib u eegid la kormeeray adiga oo kusoo gudbinaya Daaqada Bixiyaha WA Compass.* ***(https://dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider/wa-compass)***

*Wixii mushkiladaha gelintaanka ah Daaqada Bixiyaha WA Compass, iimeel ugu dir Kooxda Taageerada Bixiyaha* ***dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov*** *ama la hadal (866) 627-8929.*

**Q: Sidee ayaan idiinla soo xidhiidhayaa hadii aan wax su'aalo ah ama tabasho ka qabo nidaamka cabashda?**

**A:** *Fadlan kala xidhiidh liisan bixiyaha lagu qoray cabashada iyo sidoo kale kormeeraha liisamada marka ay ku haboon tahay.*

*Si aad mar kasta caawimaad u hesho waxaad Xafiiska Xiriirka Dadweynaha kala xiriiri kartaa 1-800-723-4831.*

**Q: Halkeen ka heli karaa nuqul ka mid ah shuruudaha WAC?**

**A:** *Waxa aan ka heleysaa nuqul Washington Administrative Code (Xeerka Maamulka Washington, WAC), halkan.* ***(https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110)***

**Q: Bixiyaha daryeelka ilmaha oo liisan haysta, halkee ayaan ka heleyaa macluumaad dheeraad ah?**

**A:** *Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Cabashooyinka Liisanka Daryeelka Ilmaha, halkan.* ***(https://dcyf.wa.gov/safety/child-care-complaints)***

---

*DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, meesha uu kasoo jeedo ama xaalada soo galaytiga, da'da, rabitaanka galmada ama aqoonsiga jinsiga, ciidanka hawlgaay ama ciidanka, xaalada hooyada naas nuujinaysa, iyo jiritaanka wixii laxaad la'aan jidh, dareen, ama maskaxdeed ama isticmaalka ayda ama xayawaanka ruuxa haga. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka* ***communications@dcyf.wa.gov****.*

DCYF PUBLICATION LIC_0157 SM (07-2024) Somali